

Furuqa Daanyeerka

La soco oo ogow calaamadaha si aad u ilaaliso naftaada iyo dadka kale

Furuqa Daanyeerka:

- Waa cudur fayras ah oo kuu keeni kara jirro.
- Wuxuu ku fidaa marar badan istaabashada maqaarka.
- Khatarta dadwaynaha guud way yar tahay laakiin hadda waxaa lagu arkay dad gaar ah.



Siday u Faafto



Taabashada tooska ah ee finanka furuqa daanyeerka, qolofa, ama dareeraha jidhka.



Dhunkashada, laab-galinta, iyo marxabaynta



Taabashada walxo/maro taabatay finan faafa, qolof, ama dheecaannada jidhka.

Furuqa daanyeerka waxa uu fidi karaa marka ay astaamuhu bilaabmaan ilaa ay finanku ka bogsadaan, qolofa oo dhami ay daadato, oo lakab cusub oo maqaarku samaysmay. Dadka aan lahayn calaamadaha cudurka uma gudbin karaan dadka kale.

Astaamaha iyo Calaamadaha



Qandho



Qarqaryo



Qanjidhada oo barara



Madax xanuun



Murqo ama jir xanuun



Finan ama nabarro

Waqtiga laga bilaabo caabuqa ilaa calaamadaha caadi ahaan waa 7 ilaa 14 maalmood laakiin wuxuu u dhexeeyaa 5 ilaa 21 maalmood. Haddii calaamado hargabku u eg imaadaan, finanku badanaa waxay soo baxaan 1-4 maalmood ka dib. Xanuunku wuxuu caadi ahaan socdaa 2-4 toddobaad.



Wixii wargelin ah, qoraal ugu dir **COSD MONKEYPOX** lambarka 468-311. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo:

SanDiegoCounty.gov/monkeypoxSD